



Xogag Kooban: Xaquuqaha Dhanka Guri ka Saaridda ee Kiraystayaasha Khatarta u ah inay qabtaan askarta Laanta Socdaalka iyo Jinsiyadahu (Immigration)

Quick Facts: Eviction Rights for Renters at Risk of Immigration Action

Waa maxay xaquuqdaydu kirayse ahaan haddii aan khatar u ahay inay i qabtaan askarta laanta Socdaalka iyo Jinsiyadahu (Immigration)?

Waxa aad leedahay xaquuqo la mid ah kuwa kiraystaasha kale. Arrintani ma quseeyso waxa uu yahay sharciga aad wadanka ku leedahay. Haddii wali aad guriga ku nooshahay, qoladda gurigu waxa kaliya oo ay guriga kaaga saari karaan iyagoo kiis maxkamad ka xareysta, la yiraa dacwo guri ka saarid. Eeg warqadayada xogta aruursan ee barta [Guri ka Saarida](#).

Haddii qoladda gurigu ay bedelaan qofulka ama albaabkaaga saaraan, taa waxaa la yiraa guri ka xirasho. Waana sharci-darro, xataa haddii kiraddii lagugu leeyahay.

Haddii qoladda aad guriga ka kiraystay ay isku daydo inay guriga kaa bixiso iyagoo kaa goyanaya biyaha, kulaylka, ama korontada, taasi waa goyn. Waa sharci-darro, xataa haddii kiradii aadan bixin.

Ka eeg warqadayada xogta aruursan ee barta [Guri ka xirashada ama ka Goynta Biyaha iyo Korontadu waa Sharci-darro](#).

Ka waran haddii aan wajahayo guri ka saarid?

Haddii aad khatar u tahay guri ka saarid, isku day inaad caawimaad heshid markiiba.

- Haddii aad danyar tahay, ka wac xafiiska gargaarka dhanka sharciga (legal aid) ee deegaankaaga khadka ah 1-(877) 696-6529. Waxa aad ka heli kartaa khayraadyo kale oo badan, xafiisyo gargaarka dhanka sharciga (legal aid) ah, iyo caawimaadyo kale khadka ah: <http://www.lawhelpmn.org/so>.

Waxa aad xaqu leedahay inaad siiso qoladda guriga cadadka lacagta ah ee ay yiraahdaan waa lagugu leeyahay si aad uga badbaado guri ka saarida.

- Haddii qoladda gurigu ay rabto inay xaraysato dacwo guri ka saarid ah oo adiga kaa dhan ah oo kiro bixin la'aan awgeed ah, waa khasab inay ku siiyaan 14-cisho oo ogaysiis ah ka hor inta aysan xareysan dacwadda guri ka saariida ah.
- Qaar ka mid ah magaalooyinku waxa ay u baahan yihiin bixin ogaysiis intaa dheer ka hor inta qoladda gurigu aysan xareysan dacwo. Magaalooyinka Minneapolis, St Louis park, iyo Brooklyn Center qolyaha guriyahu waa inay ku siiyaan 30 cisho oo ogaysiis ah ka hor xareysiga dacwo.

Ogow: Brooklyn Park waa 30-cisho oo ogaysiis ah inay bixiso ilaa bisha Abril 15, 2026. Richfield waa inay 30-cisho oo ogaysiis ah bixiso ilaa bisha Maajo 18.

Maxkamadda ha goyn xataa haddii aad heshiis la sameysay qoladda guriga. Qoladda gurigu waa ay tagi karaan maxkamadda, haddii aadan adigu joogina, xaakimka waxaa dhici karta inuu amro guri ka saarida.

- Tag maxkamadda xataa haddii qoladda gurigu ay ku tiraa uma baahnid inaad tagto!
- Haddii kiiskaaga loo qabto balan dacwo qaadid oo xaadir la wada yahay, waxa aad xaq u leedahay inaad waydiisato xaakimka in dacwadaadda lagu qaado khadka adigoo gurigaag jooga. kolkaa ma aha inaad maxkamadda tagto. Uma baahnid inaad cid u sheegto sharciga wadanka aad ku leedahay si aad u hesho in dacwadaadda khadka lagu qaado. Wac maxkamadda ama kala hadal qareen sidda loo codsato dacwo qaadid khadka ah.

Ka eeg warqadayada xogta aruursan barta, [Xaquuqda Kiraystaha ee Guri ka Saarida haddii laqu Xiro ama aad ka Bagayso inaad Dibadda u Baxdo](#) wixii faahfaahinmo dheeraad ah.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.